

Sida loo codsado caymiska

Barta internet-ka

Ka codsashada barta internet-ka ah ayaa si degdeg ah kuu tusin doonta haddii aad xaq u leedahay caymis bilaash ah ama mid qiimahiisu jaban yahay oo loo marayo Apple Health. **Waxaad codsan kartaa waqti kasta, sannadka-oo dhan. Ka bilow wahealthplanfinder.org**

Waxaad u baahnaan doontaa macluumaadaan kahor inta aadan bilaabin:

- Dakhliga bilaha ah ee qoyskaaga.
- Macluumaadka socdaalkaaga, haddii taasi laguuga dabaqi karo.
- Taariikhaha dhalashada xubin kasta oo qoyskaaga ah.
- Lambarrada Dammaanada Bulshada ee xubin kastoo qoyska ka tirsan ee caymiska codsanaya, haddii taasi laguuga dabaqi karo.



Qaabab kale ee loo codsan karo

Wac (telefoonka lacag la'aanta ah) 1-855-923-4633
TTY/TTD 1-855-627-9604

Caawiyeyaal/hageyaal qof-ahaan ah

Wac lambarka telefoonka bilaashka ah ee kor ku xusan si aad u hesho caawiye shakhsi ahaaneed, ama booqo **wahealthplanfinder.org** ka-dibna dhagsii Linkiga Taageero Hel.

Boostada

Foomka codsiga ka soo dagso
hca.wa.gov/health-care-application
ka-dibna raac tilmaamaha boostada.

Ma u baahantahay in laguugu caawiyo codsashada?

Takhasusleyaasha isqoritaanka ee kusalaysan-bulshada

Takhasusleyaasha ka ahaada Maamulka Daryeelka Caafimaadka waxay joogaan isbitaalada, xarumaha caafimaadka, waaxooyinka caafimaadka, iyo xarumaha wacyi gelinta ama lagaari karo ee bulshada ee kuyaala degmada. Eeg liiska ku qoran: **hca.wa.gov/hcacomunitystaff**

Caawiyeyaal ama hageyaal qof-ahaan ah

Lagu tababarey isticmaalka Washington Healthplanfinder, caawiyeyashaan/hageyayaalkaan waxay joogaan meelo baddan oo bulshada kamid ah. Mid hel adiga oo wacaya 1-855-923-4633. Istimaaaleyasha TTY/TDD, fadlan wac 1-855-627-9604.

Wada-hawlgalayaasha bulshada

Shaqaale ama dad iskaada wax u qabso ah oo jooga bulshada degmada-kusalaysan ururada—xarumaha caafimaadka, isbitaalada, iyo ururu aan-faa'iido doon ahayn—ayaa kugu caawin kara in aad codsatid.

Waxda caafimaadka degmadaada

Wac si aad u oggaato waxa laga heli karo goobta aad degantahay.

Tabarucayaasha SHIBA

Tabarucayaasha tooska SHIBA (Lataliyayaasha Dheefta Ceymiska Caafimaadka Gobolka oo dhan ah) waxay kusiinayaan caawimaad doorashooyin daryeel caafimaad sir, cadaalad, iyo bilaash ah. Wac 1-800-562-6900.



Maamulka Daryeelka Caafimaadka wuxuu u hoggaansamayaa dhammaan sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka Washington iyo dowladda federaalka waxaana ka go'an in uu suurtageliyo in si siman loo helo adeegyadeenna. Haddii aad u baahan tahay diyaafadin, ama u baahan tahay dokumeentiyo ku qoran luuqad kale ama qaab kale ah, fadlan wac 1-800-562-3022 (TRS: 711).



Marnaba sidan oo kale uma sahlanaayn in la helo caymis caafimaad bilaash ah ama qiimahiisu jaban yahay



Matahay qof u qalma?

Apple Health loogu talagalay Dadka waaweyn

Waad u-qalmi kartaa haddii:

- Haddii ay da'daadu u dhaxeeyo 19 iyo 65 sano jir.
- Haddii aad deggan tahay Washington.
- Haddii aad tahay muwaadin Mareykan ah ama aad buuxiso shuruudaha socdaalka ee Medicaid.
- Haddii dakhligaaga qoyska sannadlaha ah uu yahay ama ka hooseeyo qaddarada lagu muujiyey shaxda xaq-u-yeelashada Dakhliga.

Apple Health loogu talagalay Haweenka Uurka leh

Barnaamijkan wuxuu bixiyaa caymiska haweenka uurka leh ee leh dakhli la xisaabin karo ama ka yar boqolkiiba 198 ee heerka saboolnimada federaalka iyada oo aan la eegin xaaladda socdaalka ama jinsiyadda. Caymiska Uurka-Ka-dib (APC) waxay bixisaa caymis ka-dib marka uu uurkaagu dhammaado. Eeg shaxda xaq-u-yeelashada dakhliga ee dhanka midig.

Apple Health ee loogu talagalay Caruurta

Ceymis kujiridu waa mid bilaash u ah caruurta katirsan qoyska ee leh dakhli ah ama kahooseeya boqolkiiba 215 ee heerka saboolnimada dowlada iyo lacag ceymis bileed hoosaysa oo lahehi karo oo lasiinayo caruurta katirsan qoyska leh dakhli ah ama kahooseeya boqolkiiba 317 ee heerka saboolnimada dowlada. Eeg shaxda xaq-u-yeelashada dakhliga ee dhanka midig.



Xusuusino Muhiim ah

Ka eeg haddii aad xaq u leedahay Washington Apple Health (Medicaid) boggan hca.wa.gov/apple-health-eligibility. Waxaad iska diiwaangelin kartaa waqti kasta, sannadka oo dhan, bartan wahealthplanfinder.org.

Haddii aadan xaq u lahayn Apple Health, waxaad xaq u yeellan kartaa caawimaadda caymiskaaga caafimaadka ama adeegyo caafimaad kale.

Jadwalka U qalmida Dakhliga 2024, Washington Apple Health (Medicaid)

<i>Waxaa dhici karta in aad u qalantid ...</i>	Kaliya qofkaan	Qoys 2 qof ah	Qoys 3 qof ah	Qoys 4 qof ah	Qoys 5 qof ah	Qoys 6 qof ah	Qoys 7 qof ah	Qoys 8 qof ah
Apple Health loogu talagalay Dadka waaweyn (dadka waaweyn ee ay da'doodu tahay 19 ilaa 65)	\$1,732 bille \$20,784 sanadle	\$2,351 bille \$28,212 sanadle	\$2,969 bille \$35,628 sanadle	\$3,588 bille \$43,056 sanadle	\$4,207 bille \$50,484 sanadle	\$4,825 bille \$57,900 sanadle	\$5,444 bille \$65,328 sanadle	\$6,063 bille \$72,756 sanadle
Apple Health loogu talagalay Haweenka Uurka leh iyo APC	\$2,485 bille \$29,820 sanadle	\$3,373 bille \$40,476 sanadle	\$4,260 bille \$51,120 sanadle	\$5,148 bille \$61,776 sanadle	\$6,036 bille \$72,432 sanadle	\$6,923 bille \$83,076 sanadle	\$7,811 bille \$93,732 sanadle	\$8,699 bille \$104,388 sanadle
Apple Health ee loogu talagalay Caruurta (waa u bilaash caruurta ay da'doodu tahay ilaa 19)	\$2,698 bille \$32,376 sanadle	\$3,662 bille \$43,944 sanadle	\$4,626 bille \$55,512 sanadle	\$5,590 bille \$67,080 sanadle	\$6,554 bille \$78,648 sanadle	\$7,518 bille \$90,216 sanadle	\$8,482 bille \$101,784 sanadle	\$9,446 bille \$113,352 sanadle
Apple Health ee loogu talagalay Caruurta ee haysta lacagta ceymiska bilaha ah (\$20 bileed ilmo kasta; \$40 qoyska ugu baddan)	\$3,326 bille \$39,912 sanadle	\$4,514 bille \$54,168 sanadle	\$5,702 bille \$68,424 sanadle	\$6,890 bille \$82,680 sanadle	\$8,078 bille \$96,936 sanadle	\$9,266 bille \$111,192 sanadle	\$10,454 bille \$125,448 sanadle	\$11,642 bille \$139,704 sanadle
Apple Health ee loogu talagalay Caruurta leh lacagta ceymiska (\$30 bileed ceymiska ilmo kasta; \$60 qoyska ugu baddan)	\$3,978 bille \$47,736 sanadle	\$5,400 bille \$64,800 sanadle	\$6,821 bille \$81,852 sanadle	\$8,242 bille \$98,904 sanadle	\$9,663 bille \$115,956 sanadle	\$11,084 bille \$133,008 sanadle	\$12,506 bille \$150,072 sanadle	\$13,927 bille \$167,124 sanadle

Qof kasta oo dheeri ah, kudar dakhliga bilaha ah:

Dadka waaweyn	\$619
Haweenka Uurka leh	\$888
Apple Health ee loogu talagalay Caruurta	\$964

Apple Health ee loogu talagalay Caruurta leh \$20 Lacagta ceymiska bilaha ah	\$1,188
Apple Health ee loogu talagalay Caruurta leh \$30 Lacagta ceymiska bilaha ah	\$1,421

Tirada dakhliga waxay dhaqan gelayaa Abriil 1, 2024, tooska Maarso 31, 2025.